بِسْمِ اللهِ الرَّحْمٰنِ الرَّحِيْمِ

# WAANO DUMAR

# HOOYO I MAQAL

# Qeybta 1

ASMO KHALID

**2024**

Schrijver: Asmo Khalid

Coverontwerp: Asmo Khalid

ISBN: 9789403748283

## ❖ Hordhac

Hooyo i maqal.

Wax baan kuu sheygayaa. Aysan cidna kula wadaagi doonin. Ileen dadkii, dadkii ma ahan. Dunidiina, dunidii ma ahan.

Qof kaan ku dhalin, wax ba ma kula wadaagaayo. Intuu Ilaahay swt u naxariistay mooyaan.

Sidaas ayaa igu kaliftay, inaan buugaan kuu qoro hooyo macaan. Ileen hooyo waan ogahay, qof walba inuu kuu dhoola cadeyn doono.

Umada oo dhan waxay kuu sheegi doonaan, waxaad dooneysid inaad maqashid. Laakin ma kula wadaagayaan xaqiiqda dhabta ah waxay tahay.

Hooyo i maqal. Waxaan maanta kula wadaagi doono, waxay igu qaadatay 23 sano.

23 sano oo cimrigeyga ka mid ah ayeey igu qaadatay inaan waxaan barto.

Waa cashir ay nolosha kuu dhigeyso. Meelna malaga barto. Hadaad baran laheydna, inta ku bareysa ayaa iska yar.

Marka, i yara dhageyso. Wax baan kuu sheegayaa.

Buugaan adiga ayaan kugu tala galay gabadheyda. Waa hadiyo qalbigeyga ka imaaday.

Waa hadiyo adiga kuu qaas ah.

Hadiyo, ka soo go'day qof ku jecel.

Qaabkaad doontid ii arag.

Mar hooyo ayaan kuu ahay.

Marna saaxiibtaa ayaan ahay.

Marna, walaashaa kaa weyn ayaan ahay.

Marna waxaan kuu ahay ayeeyadaa. Oo dunida soo aragtay.

Marna waxaan kuu ahay, tii ku dhiiri gelin laheyd. Oo ku siin laheyd awoodaad u baahan tahay.

Awooda aad u baahan tahay, saad iskaga dhiciso, dunidaan dhibka badan.

Hadaan qaab kale u dhaho.

Raga.

Somali waan aqaanaa.

Waan ka dhashay.

Wey i dhaleen.

Waana dhalnay.

Cid is gaadi karto ayaan jirin.

Xaqiiqda dhabta ah waan u jeednaa.

Maka hadlaayi, mida aan aaminsan nahay.

Qaab kale ayaan u dhahayaa.

Xaqiiqda habeen iyo maalin sanka iyo afka nalaga geliyo. Ay inagu qasbaan inaan aaminno.

Xaalo aan u jeedno, waxaan inaysan dhab aheyn.

Hal mid ayaan ogahay hooyo.

Haweenka Somalida, dunida daaraheeda inay ku dhibaateysan yihiin.

Xaqiiqda aan maanta kuu sheegi doono.

Waxaa dhici karto, dad badan inay ka caroodaan, qaarna ay ku farxaan, qaarna ay ka naxaan, qaarna ay awood ka helaan. Ay xaqooda ku dhacsadaan.

Xaqii uu siiyay Ilaahay swt.

Mid baan kuu sheegayaa.

Hooyo.

Dunida waan wareegay.

Dadna waan bartay.

Somali waan aqaanaa.

Bulshadeena ma ahan bulsho dumarka u nool.

Waa bulsho dumarka canaadiso, dhibaateyso, isla saxan.

Hooyada markii ay dhasho wiil iyo gabar. Waxa ugu horeyso ay sameeneyso ayaa ah inay amarto gabadheeda, inay u keento faradhaqa wiilka.

Gabdhaheena ayaan ku korinaa bahdil, gumeysi, xaq daro iyo quursi.

Gabadhii markii ay guursato, wixii ay kusoo kortay ayeey u maleysaa inay caadi yihiin.

Qaab walba hadii loo bahdilo, ma hadlayaan. Codkii ayaa ku dhagay.

Waxaa la arkaa un, haweenka Somalida qeylidooda, dagaalkooda, dhibkooda iyo madax adeegooda.

Laakin ma jirto cid is weydiiso, sababta ka dambeysa.

Maxaa dumarkeena sidaa ka dhigay?

Hooyo i maqal.

Ha cabsan.

Waa caadi.

Ileen anigaa sidaa ahaan jiray.

Qeylisooy.

Madax adeeg.

War ma maqasho.

Cidna lama tashato.

Kaligaa isku talis.

Amiirada.

Boqorada.

Kibirleyda.

Daweecad la’aan.

Af xumo.

Qumayo.

Masiibo.

Magacyadaas dhamaanteena waa naqaanaa. Dumarka Somalida ayaa sidaan kusoo koro. Gabar oo sidaan loogu wicin ayaa iska yar.

Maanta wax baan kuu shegayaa hooyo macaan.

Nolosheyda waxaan soo bartay.

Dunida waxaan ka bartay.

Waxaa dadka ka bartay.

Waxaan doonayo inaan adiga kuu sheego.

Halkaan iga soo raac.

Waxaan kuu sheegi doono ayaa ah, sir badan.

Sir aysan rabin dad badan inaad ogaatid.

Waliba raga Somalida ah.

Ma doonayaan inaad tan ogaatid.

Rag waan aqaanaa.

Wey ina dhaleen.

Waan dhalnay.

Waan ka dhalanay.

Waa leys yaqaanaa.

Waliba raga Somalida ah, gaar ahaan.

Wax xun kama sheegi doono.

Ee waxaan adiga ku bari doonaa.

Qaabkaad iskaga ilaalin laheyd bahdil, af xumo, xishmad la'aan. Iyo kuwo kale oo badan.

Halkaan iga soo raac hooyo macaan.

Dhagahaaga isii.

Maqalkaaga isoo aadi.

Maskaxdaada soo jeedi.

Qalbigaaga ii fur.

Waxaa hubaal ah inaadan ku khasaari doonin.

❖

Sir haweeen.

Waa war anaga inaga dhaxeeya.

Banaanka yuusan kaa aadin.

Ileen iyagaba qarniyo badan ayeey kaa qarinaayeen.

❖

❖

Waa sheeko dheer.

Waa qiso dheer.

Waa sir adag.

Yaanan lagaa maqlin.

Yeysna kaa maqlin.

Yaanan laguu sheegin.

Yaanan laguu been guurin.

Hooyo I maqal.

I maqal.

I maqal.

Adiga I maqal.

Wax baan kuu sheegayaa.

Hooyo I maqal.

I maqal.

I maqal.

Sir baan kuu sidaa.

Adigaan kuu wadaa.

Hooyo I maqal.

I maqal.

I maqal.

Hooyo i maqal.

War baan kuu sheegayaa.

Adigaan kuu sheegayaa.

Cid aysan kuu sheegin.

Cid aysan kula wadaagin.

Hooyo i maqal.

Adigaan kuu sidaa.

War baan kuu wadaa.

Waan ogahay.

Waa lagu dulmiyay.

Waa lagaa gardaran yahay.

Qaladkaaga ma ahan.

Waxba maadan galabsanin.

Mana muteysanin.

Iyagaa kaa qaldan.

Iyagaa ku dulmiyay.

Iyagaan u sheegayaa.

Waqtigooda wuu dhamaaday.

Adigaan kuu sheegayaa.

Waqtigaaga ayaa la joogaa.

Adigaa kor ah maanta.

Cidna yeysan kuu been guurin.

Wax waad kartaa.

Waad awoodaa.

Waana qabsan kartaa.

Awood baad leedahay.

Maskax baa lagu siiyay.

Caqli baad leedahay.

Qalbi dhaqaaqayo ayaad leedahay.

Sida dhiiga u dareeraayo qalbigaaga.

Ayuu ugu darerayaa, jaceylka. Naxariista. Qaayada iyo Qiimaha.

Ilaahay baa kuu yeelay.

Cidna yeysan kuu been guurin.

Waad kartaa.

Waad awoodaa.

Waana kartaa.

Yaanan laguu been guurin.

Waad kartaa.

Waad awoodaa.

Qiimaad leedahay.

Caqli buuxo.

Qiimo qaayo leh.

Gabar sharaf leh ayaad tahay.

Allahii abuuray uu doortay.

Dumarka dunida wareegayo ayaa lagaa doortay.

Yuusan been kuu sheegin.

Alaa ku doortay.

Muslimad xijaaban ayaa lagaa dhigay.

Jano ayuu Ilaahay swt kuula rabaa.

Bani Aadam yar.

Oo awood laheyn.

Saxaroonaayo.

Bulaacadaha buuxinaayo.

Yuusan been kuu sheegin.

Awood waad leedahay.

Ee aqbal noloshaada.

Naftaada.

Hooyo i maqal

I maqal.

I maqal.

Wax baan kuu sheegayaa.

Hooyo I maqal.

### ❖ **Afar saaxiib ayaan lahaa**

Hooyo i maqal. Mid baan kuu sheegayaa. Dadka makula jiraan. Mana kaa jiraan. Ee naftooda iyo danahooda ayeey u socdaan.

Qiso ayaan kaaga sheekeynayaa.

Afar saaxiib ayaan lahaa.

## ❖ Saaxiibteyda koobaad

Waxay aheyd gabar fiican oo diin leh. Gabar aan ku farxo ayeey aheyd. Xili waxaan is baranay, aniga aan kalinimo dareemaayay.

Hal saaxiib un ayaan lahaa. Gabadhaas ayaa gabadhaan kale i bartay. Sidii ayaa saaxiib ku noqonay, isku fasal ayaa noqonay.

Gabadhaan ayaa aheyd gabadha kaliya aan la socdo. Mataano oo kale, marna makala hari jirin.

Gabadhaan ayaa aheyd, mid nolosheeda raacata. Oo waxay jecleyd inay noqoto gabar faraxsan. Taasi ayaa sababtay in badan inaan qosli jirnay.

Wax walbo ayaan isku dayi jirnay, dadka ayaan dhibi jinay. Anaga is dagaali jirnay. Nolosha farxadeeda ayaa raadin jirnay.

Arinkaan ayaa ahaa mid aniga aad iyo aad ii farxad geliyay, ileen xiligii aan gabadhaan baranaayay ayeey aheyd, xili aan cabsan jiray.

Xaalado badan oo culus ayaan la kulmaayay, laakin aanan cidna u sheegin. Cidna lama wadaagi karin.

Gabadhaan ayaa ii aheyd, mid aan ku nafiso. Markaan iyada la joogo, dhibaatooyinkeyga ayaan iloobaa. Nolosha ayaan ku farxaa.

Gabadhaan ayaa sanado badan wada soconay.

Gabadhaan waxaan saaxiibo aheyn 5 sano iyo bar. 5 taas sano waxay ahaayeen xiliyadii nolosheeda ugu dhibka badneed. Intaan soo arkay.

Dhibaatooyin badan ayaan la tacaalayay. Nolosha ayaa cashiro badan ii dhigeysay.

Waxaan raadin jiray ayaa aheyd meel aan ku nasto. Qof aan ku nafiso.

Gabadhaan ayaa nafiskaas ka helay. Mar walba aan murugsanaa iyada ayaan wici jiray. Sheekadeena iyo wada hadalkeena ayaa aad iyo aad u dheeraa.

Markaan iyada la kulmo kadib, ayaa mar walbo waxaan sameeyn jirnay, wax yaalo badan oo i farxad geliya.

Ileen nafis ayaan raadin jiray. Nafiskaas ayaa iyada ka helay.

Waxaa badnaa inaan meelo badan aadno. Iyada, aniga oo kale ayeey aheyd, dadka badan ma jecleyn. Labo qof ama hal qof ayaa ku filnaa.

Taasi ayaa keentay, labadeena mar walba inaan isla socon jirnay. Oo meelo badan wada aadi jirnay.

Badanaa waxaa dhici jirtay, anagoo iska fadhino, in uu qof wax dhaho. Markaas ayaan ku dhaqaaqi jirnay wixii la dhahay.

Badanaa waxaan joogi jirnay maktabadaha, meelaha ay dadka iskugu imaadaan, suuqa.

Nolosha iftiinkeeda ayeey i tusin jirtay. Gabadhaan ayaan u qaatay inay ii aheyd saaxiibteyda nolosha.

Waxaa ii go'aansanaa inaan gabadhaan cimrigeyga saaxiib lasii ahaado. Ileen qof diin leh ayeey aheyd, oo hadane i farxad geliya. Arinkaan ayaan ku farxay.

Xiligaan iyada la socon jiray ayaa aheyd, xili nafteyda ay ciriiri ku jirtay. Taasi oo sababtay, inaan ahaa qof mar walba raadiya meel uu ku nasto.

Farxad, degenaansho, qosol, sheeko dheer iyo nasasho ayaan raadin jiray. Gabadhaan ayaan ka helay agteeda. Saaxiibteyda ayeey sidaas ku noqotay.

Baahida aan xiligaa qabay ayaa aheyd, inaan raadiyo degenaansho iyo meel aan ku nasto.

Waxa iga maqnaa ayaa aheyd, inaan helo meel aan wax walba ku iloobo.

Gabadhaan markaa la joogo, dhibaatooyinkeyga oo dhan ayaan iloobi jiray.

Taasi ayaa keentay, inay ii aheyd, taan ku nasan jiray. Oo wax walba la wadaagi jiray.

Mid baan kuu sheegayaa hooyo macaan.

Bani Aadamka makula jiraan. Mana kaa jiraan, ee naftooda ayeey u socdaan.

Arinkaas ayaa dhab ah. Managa dhigeyso qof xaasid ah. Qof daneyste ah. Qof tiisa un u socda. Ee waxay naga dhigeysaa Bani Aadam.

Sidaad filan karto, sanado kadib, gabadhaan waan jaray. Markaan gabadhaan jaray kadib ayaan waliba farxad dareemay iyo nasasho. Degenaansho.

Waxaan dareemay sidii culees badan inuu iga dagay.

Gabadhaan intaan jarin kahor ayaa wax yaalo badan dhaceyn.

Xiligaan iyada la socon jiray, waxaan ka heli jiray wixii iga maqnaa. Waxaan doonayay ayaan iyada ka helay. Sidaas ayaa keentay inaan la socdo. Anigoon ka fikirin.

Wixii iga maqnaa, ayaan gabadhaan ka dhex arkay, iyada ayaa waxaas heysatay. Iyada ayaan ka baran karay. Iyadii ayaan la socday, oo sanado badan ayaan aheyn saaxiibo laxmi ah oo wax walba wadaaga.

Gabadhaan saaxiibtinimadii inaga dhaxeysay, aniga ayaa gooyay. Dad badan ayaa arinkaas ka xumaadeen.

Waalidkeeda ay ugu horeeyaan, waalidkeyga ay ku xigaan.

Gabadhaan hooyadeeda ayaa aheyd, haweeney aad iyo aad u fiican. Ilaahay ha dhowro, hooyooyin sidaas ah, in badan maanan arkin. Masha Allah.

Hooyadeeda ayaa aheyd haweeney dhibaato kusoo kortay. Rafaad ayeey soo aragtay. Markii ay caruur dhashay, ayeey ilmaheeda u raaxeysay.

Waxay dhahday, ’’dhibaatadaan soo arkay, caruurteyda inay arkaan ma rabi.’’

Hooyadaan ayaa aheyd haweeney karti leh. Saaxiibteyda hooyadeeda ayaa aheyd, haweeney mar walba ku dadaasha saaxiibtinimadeena inay sii jirto.

Waxay aaminsaneyd, gabadheeda inay wax yaalo badan iga barato, ay igu deysan karto.

Hooyadeyda ayaa iyadane aheyd, mid aad iyo aad ugu faraxsan gabadhaan xiriirkeeda.

Hooyadeyda ayaa aaminsaneyd, gabadhaan inaan wax yaalo badan ka barto. Inay mudan tahay inaan ku deysto.

Waalidiinteena ayaa ku dadaali jiray inaan wada socono.

Mararka qaarkii waxaa dhici jirtay, hadii aanan mudo is arkin. Hooyadeeda inay soo amarto, aniga inay isoo raadiso, oo aan is aragno.

Mararka kalane waxaa dhici jirtay, hooyadeyda inay i dhahdo, ''gabadhaas ma arkin. Ma is dagaasheen?''

Hooyadeyda ayaa i amri jirtay, inaan gabadhaan u tago, oo is aragno.

Xaalada siday mudo badan sidaan u aheyd.

Sanado badan ayaa wada soconay. Waan wada faraxsaneyn. Cid nasoo dhex geli karta ayaan jirin.

Laakin midbaa jirtay. Iyada ay ogeyd, anigane aan ogaa. Cidna aanan la wadaagi jirin.

❖

Sanado badan sidaan u wada soconay. Ayaa waxaa dhacday. Inaan aniga is badalo.

Nolosheyda siday tahay ayaa nacay. Waan ka daalay. Ilaahay swt ayaa qalbigeyga geliyay baahi.

Baahi badan.

Waxaan baahi u qabay degenaansho, farxad, lacag, mustaqbal wanaagsan, inaan umada caawiyo, inaan nolosheyda wax ka badalo, inaan umada noloshooda wax ka badalo.

Xiligaas ka dib, qoftii hore ma aheyn. Qof kale ayaa soo baxday. Waxaa noqday, qof ku mashquulsan sidaan nolosheyda wax uga badali lahaa.

Dad badan ayaa jiro, kugu faraxsan, kuna jecel. Inta aadan iyaga ka sareynin. Laakin markii ay arkaan inaad iyaga ka dubanaaneyso. Wey caroonayaan.

Tii ayaana dhacday.

Gabadhaan xiligaan la socon jiray ayaa aheyd, xili ay dhibaatooyin badan ka jireen nolosheyda.

Madax xanuun badan ayaa wadada la mari jiray. Gabadhaan ayaa nafis ka helay. Arinka halkaa kuma ekaanin.

Anigii ayaa ciriiri dareemi jiray. Waxaan raadin jiray qof ciriiriga iga saaro. O nafis ku dareemo.

Hooyo, waa tani midaan ka hadlaayo.

Bani Aadamka ma kula jiraan. Mana kaa jiraan, ee naftooda ayeey u socdaan. Cid adiga dan kaa leh ayaan jirin.

Hada ka hor ayaan maqlay, qof dadka arintaan baraayo.

Nafteena ayeey ku jirtaa. Sidaan ayaan u dhaqannaa, ileen qof walba waxa ka maqan ayuu raadiyaa.

Dadka ayaa ah, kuwo mar walba soo jiita, waxa iyaga aysan heysanin.

Qof walba ayaa sidaan u dhaqmo. Dadka oo dhan ayaa sidaan ah. Kaliya maka fikirno.

Mudo badan ayaan arinkaan raadin jiray. Waana soo ogaaday. Mudo dheer ayaan ka fikiri jiray. Waana xaqiiqo.

Qofka wuxuu soo jiitaa waxa isaga ka maqan.

Dadka murugta ay heysato, ma raadiyaan dad kale oo murugsan. Hadii ay mid ku arkaan arintaan, wey ka fogaadaan.

Dadkaan noloshooda ayeey u arkaan mid mugdi ah. Mugdi kale masii xamili karaan.

Waxay raadiyaan ayaa ah iftiin. Qof faraxsan ayeey raadiyaan. Say iyagane u farxaan.

Qofka kalsoonida ay ku yar tahay. Wuxuu mar walba jecel yahay inuu helo, uuna la socdo dad kalsooni leh.

Dadka kalsoonidooda ay sareyso, inuu la socdo ayuu jecel yahay.

Dadka lacagta rabo inay helaan. Waxay raadiayan, ayna la socdaan dad lacag heysto. Say iyaga uga bartaan qaabkii ay lacagta u sameysteen.

Dadka cilmiga doonaya. Waxay raadiyaan qof cilmi leh, say cilmigaas uga bartaan. Bani Aadamka oo dhan ayaa sidaan ah.

Qof walba dantiisa ayuu u socdaa.

Adiga ka fikir. Qof walba oo noloshaada ku jiro, dan baad ula socotaa. Ha noqoto dan muuqata, ama mid aan muuqanin.

Ha noqoto dan aad ogtahay, qofkaasna aad ula socotid adigoo ula jeedo kaleh in ay danahaaga kuu fulaan.

Sidey doontaba ha noqoto.

Waxaa hubaal ah, qof walba oo noloshaada ku jiro, inuu sabab un ugu jiro. Bilaa faaido, qof aad waqtigaaga siisid ma jiro.

Dan un ayaad ka leedahay. Ha noqoto dan muuqata ama mid aan muuqanin.

Ha noqoto dan ule jeedo leh, ama mid aan loo fikirin.

Laakin dan ayaa meesha taalo. Dantaas ayaad ka heleysaa, dadka noloshaada ka mid ah. Dantaas daraadeeda ayaad u heysataa. Hadii ay dantaas bada ka baxdo, dadkaas noloshaada ayaad ka saareysaa.

Adigoon ogeyn, oon ka fikirin ayaa sidaan tahay. Qof walba ayaa sidaan ah.

Xaqiiqda dhabta ah, oo xanuunka badan ayaa sidaan ah. Waxaan kuu sheegayaa qaab kale aysan xanuun ku noqoneynin.

Waa sababta ay u bateen daneystayaasha. Dadka umada ku daneysta. Danahooda inta ay uga fulayaan un ayeey meesha joogaan. Markii ay danahooda gaaraan wey dhaqaaqayaan.

Tusaale ahaan:

Ma is weydiisay sababta ay dadka u kala tagaan?

Sababta uu furiinka u dhaco?

Furiinka ayaa badanaa dhaco. Qofka marka uusan heli karin danahiisa.

Baahiyaasha uu qabo, marka loo buuxin waayo, ayuu dhaqaaqaa.

Qofkaan hadii dhibaatooyin badan lagu furo. Furiin ayuu kaa dalbadaa.

Ileen qof dhibaato doonaayo ayaan jirin.

❖

Dadka marka ay wada shaqeeyaan kadib. Qof ka mid ah uu qiyaamo. Qofkaan ayaa carooda.

Maxaa keenay caradaas?

Caradaas waxaa keenay, qofkaan inuu ka waayay meeshaan wuxuu filanaayay. Wax uusan filaneynin ayuu halkaan ka helay.

Bani Aadamka oo dhan ayaa wada daneystayaal ah. Laakin kor uma dhahno.

Anagoon ka fikirin ayaan sidaan ku dhaqannaa.

Maxaa keenay inaad noloshaada ka fogeysid qofka akhlaaqda xun.

Waayo, waxaad ogtahay, in qofkaas uu adiga halis kuu yahay. Akhlaaqdaada ayuu wax u dhimi karaa.

Maxaad u dhihi weyday, qofkaan waan la soconayaa, si aan akhlaaqdiisa u badalo. Suu u noqdo qof wanaagsan.

Maadan dhihin. Waxa kaliya aad ka fikirtay ayaa aheyd, qaabkaad naftaada ku badbaadsan laheyd.

Aakhiro ka sokoow. Dunidaan ayaan ku nahay, umad u wada socota naftooda un.

Qofka baahidiisa ha yaraato, ama ha weynaato. Haduusan meeshaas ka heli karin. Wuu dhaqaaqayaa.

Sababaha leysku furo, raadi. Sii tixraac. Wareyso. Daraasey. Umada weydii.

Ugu dambeyn, hal meel ayeey ku dhamaataa. Taasi oo ah. Qofkaan danihiisa mid ka mid ah, ama guud ahaan, inuu heli waayay.

Taasi ayaa keentay inuu dhaqaaqo. Uu danahiisa meelo kale ka raadsado.

Hadaan sidaan u sheego, waxay u egtahay arin aad iyo aad u xun.

Qaabkaad u dhigtid ayeey ku xerantahay. Iyo dhankaad ka fiirisid. Laakin mid ayaa sax ah. Aysan cidna mooganeyn.

Bani Aadamka in aysan kula jirin. Ayna kaa jirin. Xaqiiqda saxda ah ayaa ah, qof walba inuu u socdo danahiisa.

Dhankaad rabtid u fiiri. Saad rabtid u rog rog. Hal meel ayeey ku dhamaaneysaa.

Cidna in aysan sii joogeynin, hadii ay weydo danaheeda mid ka mid ah, ama dhamaan.

Cidna ma kula sii soconeyso, hadii ay kaa heli waayaan waxay doonayaan.

Cidna ma kula sii joogeyso, hadii ay kugu arkaan, waxay iyaga dhibsanaayaan.

Isla meeshaas ayeey kaaga dhaqaaqayaan. Iyagoon marna adiga kaa fikirin. Ileen qofkaan dantiisa iyo naftiisa ayuu fiirsanayaa.

Baahi uu lahaa ayuu kaa waayay, ama dhibaato uusan dooneynin ayaad dusha ka saareysaa. Intaba wuu kaa dhaqaaqayaa.

Goormee dhahnaa, qofkaan wuu khasaaray. Ama shirkadiisa ayaa khasaartay.

Sidaas waxaan dhahnaa, markii uu qofka ka heli waayo shirkadiisa natiijadii uu doonaayay. Markaas ayaan dhahnaa, ''shirkadaan wey khasaartay.''

Ileen qofkaan dano gaar ah ayuu lahaa, dantii ayuu ka heli waayay shirkadaas, marka shirkadaas wey khasaartay ayaa la dhahaa.

Waxa shirkadaa ka dhigaayo mid khasaartay ayaa ah, in laga heli waayay lacagtii ama shaqooyinkii loo baahnaa in laga helo.

Arinku sidaa ayuu u yaalaa. Waa mid fudud.

Qof walba oo noloshaada ka mid ah fiiri. Ii sheeg. Sababta uu qofkaan noloshaada uga mid yahay?

Ka fikir midaan.

Waxaad ogaan doontaa, qof walba oo noloshaada ka mid ah, inuu dano adiga kuu gaar ah oo kuu buuxinaayo.

Baahiyaasha aad leedahay, kuwo ka mid ah ayuu kuu buuxinaayaa. Taasi ayaa keentay inaad qofkaan la socotid.

Sababta ay waalidiinta caruurtooda caasiyaal ugu wacaan ma ogtahay?

Sababtaas ayaa ah, waalidkii ayaa wax badan cunugaas usoo qabtay. Cunugii marka uu weynaaday, ayuusan waalidkii ka helin wax yaalaha uu u baahnaa.

Baahidiisa ayuu ka helin. Taasi ayaa cunugaas caasi ka dhigtay.

Cunugaas waa lagu soo rafaaday, waa lasoo koriyay. Ka dibna waalidkiisa wanaag muusan u falin. Caasi ayuu sidaas ku noqday.

Ileen ma isku dayin in uu waalidkiisa wanaag u falo. Ma isku dayin in uu gudo, danaha ay waalidiintiisa leeyihiin.

Caasinimada waa taa.

In kastoo uu waalidka xaq weyn inagu leeyahay. Caasinimadane ay tahay, wax ay diinteena diiday, ay san ogoleyn.

Hadaan dhinac kale ka fiirino arinkaan, sidaan ayeey kusoo gaba gaboobeysaa.

Waalidkii ayaa ka waayay cunugaan danahii uu lahaa.

❖

**Gabadhaan sababtii aan u jaray.**

Gabadhaan nolosheyda ayaan ka saaray. Ileen maanan ka heli karin waxaan doonayo. Waxaan rabin ma iga joojinin.

Dhibaatooyin aan dooneynin ayaan kala kulmay, wanaag aan raadinaayay ayaan ka waayay.

Anigoon cidna la tashanin, oon ka fikirin. Ayaan gabadhaan jaray.

Markay dhibaatada i heysay, waxaa jirtay wax yaalo badan aanan arki jirin.

Ileen qofka ay dhibaatada heysato, naftiisa ayuu ku mashquulsan yahay. Umada kale ma fiirinaayo.

Gudaha ayaa qofkaan dhibaato uga furan tahay. Qofkaan ayaa ah, mid maskaxdiisa ku jira.

Qof banaanka jooga ma ahan. Waa qof fikirkiisa iyo maskaxdiisa ay naftiisa ku maqan yihiin. Asaga ayaa iska fikiraya. Dhibaatada heysato ayuu ka fikiraayaa.

Qofkaan ayaa ah mid ka fikiraayo. Wixii dhacay, dhibaatada heysato. Qaabkuu uga bixi lahaay. Waa qof mar walba dhibaatada ka fikira. Ama dhibaatadaas xalkeeda raadiya.

Qofkaan ayaa kula jooga, laakin maskaxdiisa meelo kale ayeey wareegeysaa. Taasi ayaa badanaa keento, dad badan in aysan arkin waxa hortooda ka socda. Ileen dab ayaa gudaha uga shidan. Banaanka waxa yaalo ma arkayaan.

Isla sidii ayeey aheyd. Gabadhaan wax yaalo badan ay sameyn jirtay ayaa jirtay, laakin marna aanan ka fikirin.

Wax yaalahaas ayaa ahaayeen kuwo aan dhibsan jiray.

Marar badan ayaan kala hadlay. Marar badan ayaan ku dhahay ''waxaan jooji.'' Marar badan ayaan isku dagaalnay. Marar badan ayaan ku kala caroonay. Laakin marna ma aysan joojinin arintaan. Ugu dambeyn sidii ayaan ku kala go'nay.

Wax yaalaha ay sameyn jirtay aan aniga ka heli jirin waxaa ka mid ahaa.

Hadii uu qof kale ina soo dhex galo, ama uu noo imaado. Ama ay dhacdo inaan wada shaqeyno.

Waxa ugu horeeyo ay sameyn jirtay ayeey aheyd. In ay isku daydo aniga inay i bahdisho.

Khaladaadkeyga ayeey qofkaas u sheegi jirtay. Meelahaan ku fiicneyn ayeey u muujin jirtay.

Qof kale hadii uu ina soo dhex galo. Isla markiiba qof kale ayeey noqon jirtay. Waxay isku badali jirtay xiligaas cadowgeyga.

Qofkaas ayeey la safaneysaa. Waxay isku dayi jirtay ayaa aheyd, qofka kale inay u muujiso inay aniga iga sareyso.

Qofkaas ayeey la safan jirtay. Badanaa dadkaan ina soo dhex gala, ama xiligaas nala jooga. Waxay ahaan jireen dad ogaa inaan gabadhaan saaxiibo aheyn.

Ileen waxay na arki jireen, maalin walba inaan isla socono.

Dadkaas ayaa badanaa aamusi jiray. Oo waxay sheegaan ma garan karin xiligaas. Waxay na dhihi jireen.

’’hadaad is dagaalsan tihiin, heshiiya, waqti ayaan idiin siinayaa, waan baxaa, idinka waxa idiin dhex yaalo xalista.’’

Markaas ayeey ugu jawaabi jirtay. ’’Wax na dhex yaalo malahan, ee waxa jiro ayaa ah, inay iyada sidaan sameyso, ama ay sidaan tahay.’’

Umada dhexdeeda ayeey igu bahdili jirtay.

Aniga waxaan arki jiray, daweecadaheeda wanaagsan. Markii ay sidaan sameyso. Isla markaas waan is dagaali jirnay.

Wey i raali gelin jirtay. Mudo ayeey isku dayi jirtay, inay i tusiso inay ka qoomameyneyso wixii ay sameysay.

Markaas kadib ayaan hadane wada socon jirnay. Xaalka sanado badan ayuu sidaan ahaa.

Waxaa dhici karto inaad is dhaheysid, ’’sideed ula socon kartaa qof dadka dhexdooda kugu bahdilo?’’

Waa su’aal fiican. Waa sababta aan u dhahaayo, qofka markii ay dhibaato ku furan tahay. Ma arkaayo waxa hortiisa ka dhacaayo. Maskaxdiisa un ayuu ku jiraa. Xal ayuu raadinayaa.

Meel uu kaga baxsado dhibaatadaan ayuu raadinayaa. Aniga xiligaan waxaan ahaan jiray qof nolosheeda ka cararta.

Dhibaatada, murugada, madax xanuunka iyo walwalka ayaan ka ordi jiray. Waxaan raadin jiray meel aan ku nafiso.

Waad u jeedaa. Xitaa aniga nafteyda ayaan u socday.

Anigoon ka fikirin.

Gabadhaan ayaa in badan falal sidaan oo kale ah ku kacday.

Hada ka hor waxaan xasuustaa, anigoo fasalka ku jiro, oo cashir qaadanaayo.

In macalinkii cashirka ina siinaayay uu maqlay, iyadoo eray igu dhaheysa.

Ereygaas wuxuu ahaay mid dacaayad ah. Dadka dacaayad ahaan ayeey ka wadeen.

Wuxuu ahaay kalaam Somalida lagu caayo. Kalaamkii ayeey igu dhahday. Macalin Muslim ah ayaa cashir ina siinaayay.

Gabadhii markii ay sidaan igu wacday, ama ay kalaamkaan igu dhaheysay. Aniga waan sii jeeday. Meel kale ayaan ku mashquulsanaay.

Kalaamkii ayeey igu dhahday. Waan u jawaabay oo waxaan ku dhahay.

”erayga saad u dhigtay ma ahan. Adiga waxaad u isticmaaleysaa dacaayad ahaan, sida inuu hub yahay oo kale, laakin aniga arinkaan waa mid aan ku faano. Waa halkaan ka imaaday, marna ma igu dacaayadeyn kartid, waxaan dacaayad aheyn.”

Ereygaas ayaa ahaay, mid xiligaas lagu kacsanaa, oo Somalida lagu caayo. Laakin hadaan anaga Somali ahaan u fisirano, dacaayad ma aheyn, ee daweecad ayuu inoo ahaa.

Waxaan xasuustaa macalinkii cashirka inoo dhigaayay, in uu maqlay, gabadhaan waxay dhaheysay. Asiga ayaa ku carooday. Oo iyada ku qeyliyay.

Ileen wuxuu ka caronaayay ayeey aheyd, ineysan ereyga iska dhihin. Ula jeedo ayeey u dhahday. Waxay kalaamkaas u dhahday, inay aniga igu dacaayadeeso, umada ayaa maqlaayeen.

Wijigeeda ayeey ka muuqatay xamaasada ay dareemeysay xiligaas. Waxay rabtay ayeey aheyd, inaan caroodo, oo iyada u jawaabo.

Waxay rabtay inaan xanaaqo. Ay iyadane qososho. Ay markaas igu dhahdo. ''kaftan ayuu ahaay, adiga daweecad ma lihdid, waxba makaa qosol siiyo''

Gabadhaan ayaa aad iyo aad u aqaanay. Waxaan ogaa waxay dhihi rabto. Ileen marar badan ayeey falalkaan ku dhaqaaqday.

Macalinkii ayaa ahaay, mid agteeda jooga. Gabadhaan meysan u jeedin. Macalinkii ayaa arkay, u jeedadeyda waxay aheyd.

Iyadii ayuu aad iyo aad ugu carooday. Ileen waa qof weyn. Wijigeeda ayuu ka arkay, waxay damacsaneyd.

Wuxuu arkay, markii ay sidaa igu wacday, wijigeeda farxada ka muuqatay.

Waxaa jiro, cadowyaal badan aad leedahay. Laakin u eg, inay miskiin yihiin.

Sokorta iyo cusbada wey isku eg yihiin. Waxaad kala saari kartaa un, markaad dhadhamisid.

Markaad dhadhamisidna, waa mar uu dhanaankaas carabkaaga taabtay. Kasoo noqosho ma lahan.

Badanaa dadka ayaa tan la mid ah.

Qofka xumaantiisa markaad arkeysid, waa mar ay ku dhibaateeyeen. Markaas kadib ayeey indhaha kuu furmayaan.

Markaas kadib ayaad wax arkeysaa.

Gabadhaan ayaa sidaan aheyd.

Ilaahay amarkiisa, xiligaas waxaan ahaa qof caradeeda ay iska badneed.

Laakin maka caroon jirin dadka waxay dhahaan. Gabadhaan ayaa aheyd, mid mar walba tan ka xanaaqda. Inaan is badalo ayeey jeclaan jirtay.

Iyada ayaa aheyd, mid ka caroota hadalada ay dadka ku dhahaan, wey ka fikiri jirtay.

Aniga xiligaas mashaqo kale ayaa ii qasneyd. Waqti aan umad kale uga fikiro ma heysanin.